Gacaliyeyaal Shakopee IHD Secondary Qoysaska,

Waxaa lagu ansixiyay shirkii Gudiga Iskuulada shakopee ee dhacay Maarso 22, **in ardayda barnaamijka IHD ee dhigata Dugsiyada Sare Shakopee oo ay kamidyihiin Dugsiga Dhexe Bariga, Dugsiga Dhexe Galbeedka iyo 'Shakopee High School' oo ka kooban fasalada 6aad illaa 12aad, waxay u gudbi doonaan waxbarshada caadiga iskuulka loo aado. Jadwalka hoose ayaa qeexayo qabka loo dhigan doono.**

Fiidiyowga soo socda ayaa soo koobaya macluumaadka hoos lagu soo bandhigay iyo faahfaahinta kale oo ku saabsan isbedelka iskuulka:

***Taariikhaha Muhiimka ah*** | *Halkan guji sii aad u aragto kalandarka degmada*

- **Maarso 26 |** Iskuul malaha dhammaan ardayda K-12 oo ay ku jiraan ardayda IHD iyo 'Shakopee Online'
- **Abriil 1| End** Damaadka Rubaca 3aad/ 3rd quarter
- **Abriil 2, 5-9 |** Fasaxa Gu'ga | Iskuul Malaha Ardayda K-12; Abriil 2 shaqaalaha iskuulada way shaqaynayaan
- **April 12-15** | Ardayda Dugsiyada Sare waxay sii wadan doonan qaabka maalin-dhaafka iskuulka loo aado , kala wareegii caadiga ahaa ee 'A/B'; Abriil 12 waa maalinta ardayda 'A day' iskuulka aadayaan.
- **Abriil 16 & 19 |** Iskuul malaha ardayda Dugsiyada Sare ee IHD | Maalmaha kala-guurka macalinka
- **Abriil 20** | Dhammaan ardayda Dugsiyada Sare ee IHD waxay ku soo noqonayaan iskuulka maalin kasta caadiga loo aadi jiray

*Fadlan la soco, Xarunta Waxbarshada ee Tokata waxay raacdaa qaybaha barnaamijka IHD, laakiin waxay leedahay dabacsanaan dheeri ah oo ku saabsan bixinta adeegyada sababo la xiriira nooca gaarka ah ee barnaamijyadooda u qorsheysanyihiin. Sidaa darteed, barnaamijyadoodu ma raacayaan jadwalka kor ku xusan.*

---

**Cusbooneysiin Cusub & Macluumaad dheeraad ah ee Dugsiga Sare (IHD)**

- **Wakhtiga Iskuulka Bilowdo / Dhamaado iyo Jadwalka**
  - Dugsiga Sare ee IHD waxay sii wadi doonaan isla xilliyadii iskuulka bilaabmi jireen iyo dhammaan jireen bilowgii sannad dugsiyeedkaan.
    - Dugsiyada Dhexe ee Bariga iyo Galbeedka: 4 xiisadood jadwalkiiba; 7:45 subax - 1:55 pm
    - 'Shakopee High School': 4 xiisadood jadwalkiiba : 8:20 am - 2:30 pm
- **Gaadiidka/Basaska**
  - Ardayda dugsiga sare waxay raaci doonaan baska oo sidiisii u socon doono (joogsiga, waqtiga iyo baska isma badelin).
    - Faahfaahinta xusuusintaan ayaa laga heli karaa bogga waalidka.

        - Haddii ardaygaagu (ardaydaadu) u qalmo baska iskuulka, laakiin hadda uusan baska raacin, fadlan buuxi sida ugu dhakhsaha badan foomka xulashada-galitaanka ee halkaan laga heli karo. Fadlan u oggolow 2-3 maalmood in dalabkaaga laga shaqeeyo. Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan baska, fadlan kala xiriir Waaxda Gaadiidka Transportation@shakopee.k12.mn.us

- **Cuntada**
    - **Cuntooyinka Iskuulka:** Muddadii ugu dambaysay ee kordhintii USDA, cuntooyinka iskuullada oo bilaash ah ayaa la sii wadayaa in la siiyo DHAMMAAN ardayda, oo ay ku jiraan cuntooyinka goobta laga helo ee ardayda dugsiga sare ee IHD. Ardayda iyo qoysaskoodu **uma** baahna inay lacag ku shubaan akoonnada cuntada.
        - Foomka cuntada bilaashka ah iyo mida la dhimay (dalabka Faa'iidooyinka waxbarashada) waa inuu wali kujiraa faylka qoysaska uqalma maaliyad ahaan waxaa lagu dabaqayaa meelo dheeraad ah oo ka baxsan cuntada.
        - Su'aalo? Fadlan emayl ugu dir Carol oo ka shaqaysa Adeegyada Cunta halkaan ctscheak@shakopee.k12.mn.us ama wac (952) 496-5141.

- **Caafimaadka & Badbaadada**
    - Ku soo noqoshada waxbarashadda fool-ka-foolka ah, waxay ka dhigan tahay inaan u baahan nahay inaan ilaalino dadaalkeenna ku aaddan ilaalinta nabadgelyada bulshada dugsigeenna. Tani waxay na siinaysaa fursadda ugu weyn inaan dhammaan ardaydeenna ku sii haysan karno dhismayaashayada maalin kasta. Halkan guji si aad u hesho xasuusin COVID-19.
        - Fadlan xusuusnow inaad guriga joogto haddii aad dareento calaamadaha COVID-19 oo wac Iskuulkaaga si aad u sheegto ka maqnaansha iskuulka.
        - Xirashada maaskaro ayaa looga baahan yahay ardayda iyo shaqaalaha. Kala fogaanshaha bulshada ayaa la filayaa marka ay suurta gal tahay. Dhaqida joogtada ah ee gacmaha ayaa si xoog leh lagula taliyaa.
        - Shaqaalaha nadaafada iyo shaqaalaha kale waxay sii wadi doonaan inay jeermiska ka nadiifiyaan oo ay nadiifiyaan meelaha taabashada badan maalintii oo dhan.
- **Isgaarsiinta Mustaqbalka**
    - Dugsiga sare ee ardaygaaga ayaa bixin doona faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada, ilaha / nidaamka xarunta iskuulka iyo waxyaabaha kale ee maalinlaha ah. Fadlan sii wad si aad u hubiso koontadaada 'Canvas' iyo emaylkaaga feylka ugu jira degmada wixii soo kordha.
    - Heerarka kiisaska COVID-19 ee Degmada iyo Degmooyinka Scott ayaa la sii wadayaa in lagu soo dhejiyo websaydhka degmada maalin kasta iyada oo la soo raacinay warbixinta iskuullada ee COVID-19, kaas oo la soo diro Arbacada kasta.

*Xusuusin Shakopee Online:*

- *Shakopee Online waa barnaamij sanadle ah oo khadka ah kana duwan barnaamijka IHD. Ardayda ku qoran ama ka qeyb qaado 'Shakopee Online' kuma jiraan nidaamka jadwalka maalinta kala guurka / qorshaynta sidoo kale faahfaahinta kore ma khusayso.*